# Waxbarashada diyaarinta dadka waaweyn (FOV)



IMDi
Integrerings- og mangfoldsdirektoratet

Direktoratet for høyere utdanning og kompetanse

Ma ogtahay inaad heli karto waxbarasho lacag la'aan ah si aad shaqo u hesho ama aad diyaar ugu noqoto waxbarasho sare? waxbarashada Diyaarinta dadka waaweyn (FOV) waa mid loogu talo galay adiga u baahan waxbarasho ka hooseysa dugsiga sare. Waxbarashadan waa mid lagu saleeyay baahidada iyo inay ku siiso fursado sareeya gudaha Norway.

## Waa maxay sababta loo qaadanayo FOV?

**Galidda waxbarasho sare -** FOV waxay ku siinaysaa aqoonta iyo shuruudaha lagaaga baahan yahay si aad u codsato waxbarashada dugsiga sare.

**Fursado shaqo oo badan -** Waxbarashada aasaasiga ahi waxay kordhineysaa fursadahaga shaqo helista.

**Hagaajinta aqoonta afka -** kor uqaadista aqoonta afka qoraal iyo hadalba.

**Xiriiro cusub hareerahaaga -** La kulanka inta kaala midka ah xaaladan iyo helitaanka asxaab wanaagsan**.**

## Waa maxay FOV?

- Waa fursad lacag la'aan u ah adiga ubaahan waxbarasho heerkeedu ka hooseeya dugsiga sare.
- waxbarasho lagu jaan gooyay baahidaada gaarka ah.

## Yaa ka qayb gali kara?

Waad ka qayb gali kartaa haddii aad:

- tahay qof ka weyn 16 sano
- si sharci ah u degan Norway
- hore usoo dhigan waxbarashada aasaasiga ah Norway (grunnskole) ama wax u dhigma
- u baahan waxbarasho dheeraad ah

## Sidee u baxaysaa waxbarashada?

Waa shan maaddo(fag) FOV: af norwiiji, cilmiga bulshada, Xisaab, saynis iyo Ingiriisi. Waxbarashada waxaa loo qaybiyay heerar ama moduler (nivåer) gaar u ah dadka waaweyn. Si loo helo heerka(moduler) aad ka bilaabayso madooyinka kala duwan, iskuulku wuxuu jaangoyn ku sameynayaa aqoontaadii hore. Haddii aad u baahan tahay barashada afka inta aad qaadanayso maadoyinka(fagene) kale, waxaad heleysaa barashado af norwiji loogu talo galay dadka tirada yar ee ku hadla afaf kale.

## Ma donaysaa maclumaad dheeraad ah?

Waxaad dalban kartaa wakhti kasta sanadka oo dhan. La xiriir xarunta waxbarashada dadka waaweyn ee degmadaada wixii faahfaahin dheerad ah iyo inay ku hagaan. La-taliyahaaga barnaamijkan ayaa kaa caawin kara arrintan.